

Xaraynta Cabashada Xuquuqda Madaniga ah

Kheyraad loogu talagalay ardayda K-12, qoysaska, iyo bulshooyinka Oregon.

Haddii aad kala kulmeyso nooc kasto oo takoorid ah oo ka dhan ah dabaqada la ilaaliyo ee dugsiga dadweynaha ee Oregon K-12 ama goobta dugsiga dadweynaha, waxaad haysataa ikhtiyaarro aad ku xerayn karto cabasho. Ikhtiyaarada xaraynta cabashada xuquuqda madaniga ah waxaa ka mid ah:



MAXALI

**Ka xaraynta
cabasho
dugsigaaga/deg
madaada**



FEDERAALKA

**Ka xaraynta
cabasho Waaxda
Waxbarashada ee
Maraykanka
Xafiiska Xuquuqda
Madaniga ah**



GOBOLKA

**Rafcaan ka
qaadashada
cabashada
Waaxda
Waxbarashada
ee Oregon**



Ka xaree cabasho dugsigaaga ama degmadaada

Dhammaan dugsiyada dadweynaha ee K-12 iyo dugsiyada dadweynaha ee Oregon waxaa looga baahan yahay sharciga gobolka inay haystaan siyaasadaha iyo hababka takoorka kaas oo daboolaya takoorka ku salaysan **da,da, naafonimada, asal qaran, isir, midab, xaaladda guurka, diinta, jinsiga, nooca galmada, ama aqoonsiga jinsiga.**

ORS 659.850

- La xiriir *mid kasta* mid kasta oo ka mid ah saraakiisha dugsiga si uu u sameeyo warbixin hadal ahaan ama qoraal ah (oo ay ku jirto iimaylka), sida Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga ah ee degmada, maamulaha dugsigaaga, sarkaal degmo, ama xubin kale oo shaqaale ah oo aad ku kalsoon tahay. **U sheeg inaad rabto inaad samayso cabasho takoor.**
- Dugsiyada qaarkood ayaa bixiya foomamka cabashada takoorka, oo aad ka heli karto dugsiga ama websaydka degmada ama adiga oo la xiriiraya mid ka mid ah dadka kor ku xusan. Foomamkan waxa loo isticmaali karaa in lagu soo gudbiyo cabasho shakhsi ahaan ama si elektaroonik ah.
- Soo hel siyaasadaha takoor la'aanta dugsiga/degmadaada iyo nidaamyada cabashada si aad u tixraacdo.

Ma heli kartid siyaasadda takoorka ee degmadaada? Mana hubtid sida aad cabasho ugu xarayso degmadaada?

- La xidhiidh Iskuduwahaaga Xuquuqda Madaniga oo weydii sida loo gudbiyo cabashada takoorka. Macluumaadka xiriirka ee Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga ah waa in lagu dhejiyaa websaydka degmada ogeysiiska degmada ee takoor la'aanta, AMA
- Kala xidhiidh khabiirka Taageerada Xuquuqda Madaniga ah ee ODE ODE.CivilRightsSupport@ode.oregon.gov ama 971-209-8278.



U xaree cabasho Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka

Takoorka ku salaysan da'da, midabka, naafanimada, asal qaran, jinsiyad, ama jinsi waxaa loo sheegi karaa Xafiiska Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka ee Xuquuqda Madaniga (OCR) iyada oo loo dacwooday ama aanad marka hore u dacwoon dugsigaaga ama degmadaada.

Mareegta OCR: <https://www.ed.gov/ku-saabsan/ed-xafiisyada/cr>





Racfaanka cabashada ee Waaxda Waxbarashada Oregon

Waaxda Waxbarashada ee Oregon (ODE) waxaa kaliya oo ay aqbashaa cabashooyinka takoorka ee dabaqada la ilaaliyo racfaan ahaan, taas oo macnaheedu yahay inaad u baahan tahay inaad marka hore ka xarayso dugsiga/degmadaada. Rafcaanada waxaa lagu xareyn karaa ODE marka aad dhammaystirto nidaamka cabashada dugsiga degmada. Habka deegaanka waxaa loo arkaa inuu yahay mid dhammaystiran marka aad la kulanto ugu yaraan mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Waxaad ka heshay go'aanka ugu dambeeya oo qoraal ah dugsigaaga/degmadaada oo dhammaystiray habka cabashada; AMA
- Habka cabashada ee tillaabooyin badan, degmadu kuma siin jawaab qoraal ah oo ku saabsan cabashadaada 30 maalmood gudahood tallaabo kasta oo habkan ah; AMA
- Degmadu ma soo saarin go'aanka kama dambaysta ah ama jawaabta 90 maalmood gudahood ee xeraynta hore ee dacwada rasmiga ah ama aan rasmiga ahayn.

Nidaamka Racfaanka ee Waaxda Waxbarashada ee Oregon (ODE)

CABASHADA LAGU SOO GUDBIYO

ODE waxay aqbashaa cabashooyinka takoorka ee racfaanka.

ODE MA Aqbali Karo Cabashada

ODE waxa laga yaabaa inaysan aqbalin cabashada sababtoo ah wakhtiga ku habboon awgeed, khaladka habraaca ama sababtoo ah bayaanka xaqiiqadu ma taageerayo sheegashada takoorka. Dacwoodaha (adiga) ayaa qoraal lagu ogeysiisay 14 maalmood gudahood.

ODE WAXAY AQBASHAA CABASHADA

Dacwoodaha (adiga) iyo degmada ayaa lagu wargeliyay qoraal 14 MAALMOOD gudahood.

JAWAABTA DEGMADA

30 MAALMOOD* gudahooda marka la helo ogaysiis ah in ODE aqbashay cabasho, degmadu waa inay ku bixiso jawaab qoraal ah.

BAARITAANKA

210 MAALMOOD* gudahooda markay aqbasho cabashada, ODE waxay baartaa oo ay go'aamisaa haddii takoorid intaa ka badan ay dhacday ama aysan dhicin. Waqti kasta kahor inta aan la bixin Amarka Kama Dambaysta ah, Dacwoodaha (adiga) iyo degmadu waxay si wadajir ah u waydiisan karaan ODE inay hakiso nidaamka si ay isugu dayaan una xaliyaan racfaanka; AMA waxaa laga yaabaa in si wadajir ah ay ODE u weyddiistaan tallaabooyinka sixitaanka.

ODE AYAA ogaatay in takoorid dhacay

ODE waxa ay soo saartaa AMAR KAMA DAMBAYSA oo leh "tallaabooyin sixid" degmadu waa in ay qaaddaa si ay u saxdo xadgudubka.

ODE waxay ogaatay in takooriddu aanay dhicin

ODE waxay soo saartaa Ogeysiiska U Hoggaansanaanta ama Kama Dambaysta ah ee xidhitaanka racfaanka.

*Muddoyinkan kama dambaysta ah waxaa loo kordhin karaa wixii sabab wanaagsan ah.

Su'aalo ma ka qabtaa xareynta cabashada takoorka?

La xidhiidh Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga ah ee dugsigaaga/degmada AMA kala xidhiidh Khabiirka

Taageerada ee ODE halkan

ODE.CivilRightsSupport@ode.oregon.gov ama 971-673-2777



OREGON
DEPARTMENT OF
EDUCATION

Oregon achieves... together!